## Adeegga Dabiibka Hadalka iyo Luqadda ee Carruurta

Talada loogu talagalay Waaldiiinta iyo Daryeeleyaasha.

# Macaamilada Waalidka iyo Ilmaha - Ku soo daridda waayo cusub iyo ereyo cusub

| Xeeladaha Ugu fiican | Sida ay tani u Caawiso |
|---|---|
| **Ku dayo dhawaaqyada iyo ereyada ilmaha.** | Isticmaalidda isla dhawaaqyada iyo ereyada uu ilmahaagu isticmaalo ayaa caawisa in iyaga lagu dhiirrigeliyo in ay isku sii tijaabiyaan.<br><br>Isku day in aad samayso dhawaaqyada xayawaanka ama baabuurta si aad u eegto haddii ay adiga kugu daydaan! |
| **Kordhi luqadda ama hadalka ilmahaaga- Ku dar ereyo dheeraad ah** | Marka aad wax yar oo dheeraad ah ku darto ereyada ilmahaaga waxaad iyaga ka caawinaysaa in ay bartaan ereyo cusub oo laga yaabo in ay ka dib ku daydaan.<br><br>Ereyo dheeraad ah ku dar hadalka ilmahaaga.<br><br>Waxay tani iyaga ka caawinaysaa in ay wax fahmaan waxayna ku dhiirrigelinaysaa in ay ereyo dheeraad ah isticmaalaan. Tusaale ahaan, haddii ilmahaagu yiraahdo "Gaari," waxaad adigu oran kartaa, "Haa, gaari **weyn**." |

| | |
|---|---|
| **Soo garo waxa uu ilmahaagu isku dayayo in ay sheegaan.** | Marka aad ilmahaaga hab togan ama wanaagsan ku maqashiiso habka saxda ah ee loo yiraahdo ereyada ay isku dayayaan, waxay taasi iyaga ku dhiirrigelin doontaa in ay ku celceliyaan ama ku tababbar qaataan dhihidda ereyada.<br><br>Eeg dhammaan hababka uu ilmahaagu kugula xiriirayo ee ay u isticmaalayaan jirkooda –codkooda, muuqaalka wajigooda, dhaqdhaqaajinta jirkooda.<br><br>Maxay isku dayayaan in ay sheegaan?<br><br>Dheh ereyada uu ilmahaagu isku dayayo in ay sheegaan – waxay tani tusaale ka bixisaa hadalka ama luqadda.<br><br>Tusaale ahaan, haddii ilmahaagu gacanta ku fiiqo koobkooda oo ay dhawaaq ku sameeyaan codkooda, waxaad adigu dhihi kartaa ereyada: “Casiir ma rabtaa? Waa yahay.” Ka dib ilmahaaga koobka sii.<br><br>Ilmahaaga ha ku amrin in ay hadalkaaga ku celiyaan. |